

Masuulka sharciga ah muxuu sameeyaa?

Warbixin loogu talagalay dadka Sweden kaligood imaado

Haddii aad sannad ahaan ka yartahay 18 sanno jir oo aad timaaday Sweden waalid la'aan ama qof kale weyn oo ku matali karo, masuul sharcii ah ayaa laguu diyaarin donaa. Masuulka sharciga ah waxaa laga yaabo in uu noqdo nin ama naag wuxuuna isaga/iyada noqon doonaa qofka weyn oo ku matalatayo iyo kugu caawinayo markii aad la xiriireysid masuulada. Masuulka sharciga ah wuxuu wax qabanaya asagoo ku matalaya si markaas aad u heshid waxa aad u baahantahay iyo waxa aad xaqa u leedahay.

Yuu u shaqeeyaa masuulkeyga sharciga?

Masuulka sharciga ah uma shaqeeyo Guddiga Socdaalka, dowlada hoose ama maamul kale. Masuulka sharciga ah wuu ku caawinayaa wuxuuna ilaalinayaa danahaaga.

Masuulka sharciga ah muxuu sameeyaa?

Wuxuu xiriir la leeyahay qareenka ("lataliyaha sharciga bulshada") kaasoo wax ka qabanaya dacwadaada magangalyada iyo Guddiga Socdaalka

Wuxuu hubiyaa in aad heshid meel ammaan ah oo ku wanaagsan in la joogi karo

Wuxuu hubiyaa in aad ka diiwaangashantahay dugsiga iyo in aad halkaas raaxo ka dareentid

Wuxuu hubiyaa in aad heshid "Kaarka LMA/Kaarka Kusugu Aqoonsiga"

Wuxuu kuu codsanaa wixii kaalmo ah ee laga yaabo in aad xaq u leedahay

Wuxuu kuu raacaa kulamada adeegyada bulshada, Dugsiga, Guddiga Socdaalka, lataliyaha sharciga bulshada iwm.

Wuxuu go'aansadaa arimaha la xiriiro caafimaadkaaga, daryeelka ilkaha iyo dhaqaalahaaaga

Wuxuu kugu caawiyyaa in aad ka war haystid qoyskaaga

Muxuusan masuulka sharciga masuul ka aheyn?

In uu ku siiyo lacag ama cunto

Daryeelka joogtada ah iyo kormeerdida

Howlaha iyo shaqada guri

In uu kuu wado iyo kaa soowado howlaha madadaalada iyo kulamada Guddiga Socdaalka, xoghayaha bulshada iwm.

Guddiga Madaxa Masuulada waa guddiga go'aansado masuulada. Guddiga ee Sigtuna, Sollentuna iyo Upplands Väsby ayaa masuul ka ah dhammaan masuulada carruurta aan lala soconin oo aan gaarin oo joogaan degmooyinkaan.